



## MAMNUUCIDA MUSLIMIINTA: MAMNUUCIDA SAFARKA IYO QAXOOTIGA

**CUSBOONEYSIIN MUHIIM AH:** Hagahan ah ogow xuquuqdaada ([This KYR Guide](#)) wuxuu soo baxay bisha Abriil 10,2018,waxaa kujira oo looga hadli doonaa Hirgelinta dowlada ay hirgelinayso talaabooyinka cusub ee qaxootiga baaritaanada dheeriga ah lagu marinaayo,iyo amarkii ay December 2017 soo saartey maxkamadda federaalka ee lagu joojiyey hayiraadii lagusoo rogey October,2017 dadka qaxootiga ah ee laleh xiriir qoys qof ama urur kajira gudaha mareykanka (bona fide relationships) iyo sidoo kale amarkii ay soo saartey maxkamadda ugu sarraysa mareykanka ee lagu ogolaadey inuu si buuxda udhaqan galo amarkii madaxweynuhu soo saarey September 24,2017 ee xayiraadda socdaalka.

*\*\*Warbixintan hoose keliya waxaa loogu talagaley iney bixiso macluumaad kooban.ee looguma tala galin iney bixiso talo sharciyeed.waxaan kutalinaynaa inaad kala tashatid qareen haga socdaalka ah wixii xaalado adiga kuu gaar ah.\*\**

### **Asalka/taariikhda Mamnuucida Muslimiinta.**

Bishii janaayo 27 , 2017.wax yer kadib markuu xafiiska lawareegey.Madaxweynaha wuxuu soo saarey amar fulineed oo tirsigiisu ahaa 13,769 ( “Mamnuucida Muslimiinta 1.0),kaas oo waqti aan lacayimin looga joojiyey qaxootiga suuriya iney wadanka mareykanka soo galaan, sidoo kalena lagu joojiyey barnaamijkii qaxootiga mareykanka ku tagi jireen mudo 120 maalmood ah,waxaa sidoo kale amarkaas lagu mamnuucay shakhsiyaadka udhashey todobo wadan oo muslimiin ubadan iney mareykanka soo galaan mudo 90 maalmood ah wadamadaas oo kala ah ( Iiraan, Iraaq, Liibiya, Soomaaliya,Suudaan, Suuriya iyo Yaman).Maxkamadaha federaalka ayaa si kumeel gaar ah ujooyey amarkaas “Mamnuucida Muslimiinta 1.0” wax yer kadib markuu dhaqan galey.

Bishii maarso,6,2017.Madaxweynaha wuxuu wax kabadel kusameeyey amarkii “Mamnuucida muslimiinta 1.0”wuxuuna kubedeley amar kale oo dib u eegis lagusameeyey oo ahaa amarkii fulineed ee tirsigiisu ahaa 13,780 (“Mamnuucida Muslimiinta 2.0”),kaas oo sidoo kale safarka kamamnuucayey lix kamid ah todobadii wadan ee hore ee muslimiinta ubadnaa (isla wadamadii marka laga reebo Iraaq ) waxaa sidoo kale mar kale lagu mamnuucay barnaamijka qaxootiga, maxkamadaha federaalka markale ayey joojiyeen sharciga Mamnuucida muslimiinta 2.0 kahor intuuusan dhaqan galin,Bishii Juun,26,2017, sikastaba ha ahaatee, maxkamada sare ayaa ogolaatey inuu dhaqan galo sharciga mamnuucida marka laga reebo dadka aan xiriir lalahayn shaqsi ama urur mareykanka kajira waxa loo yaqaano “bono fide relationship” madaxweynaha wuxuu soo saarey war qoraal ah oo uu ku hadidey in qaybta hayiraada safarka ee “manuucida muslimiinta 2.0”uu dhici doono bisha September halka qaybta hayiraada qaxootiga uu dhacaayo bisha October 24 keeda.

Bishii September 24, 2017, Madaxweynaha wuxuu soo saarey Ilaan ama war qoraal ah oo wax looga bedeley amarkii “Mamnuucida muslimiinta 2.0” kaas oo waqti aan hadidnayn hayiraad safar loogusoo rogey dadka udhashey sideed wadan sida : Chaad, Iiraan, Liibiya, Waqooyiga Kuuriya, Soomaaliya, Suuriya, Venezuela iyo Yaman (Suudaan kuma jirto liiskan ). Waxaa intaas dheer, war qoraalka wuxuu soo jeedinayaa in baaritaano dheeri ah lamarsiyo dadka udhashey wadamada Iraaq iyo Soomaaliya ee raba iney mareykanka kusoo galaan qaab aan soogalooti ahayn ee loo yaqaano (nonimmigrant entry) sidoo kale in baaritaano dheeri ah looga baahan yahay iney maraan dadka ka imanaya Iiraan ee kusafraya fiisooyinka F,M iyo J iyo in talaabooyin dheeri ah laga qaado dadka udhashey wadanka Venezuela ee fiisooyinka haysta .War qoraalkan madaxweynuhu soo saarey iyo hada sida ay tahay xaaladiisa waxaad ka heleysaa iyadoo faahfaahsan qaybaha hoose ee looga hadlayo mamnuucida safarka .

Bishii October 24,2017, waxaa dhamaadey mudadii 120 ka maalmood ahayd ee sharcigii mamnuucida muslimiinta 2.0 ee qaxootiga looga mamnuucey iney mareykanka soo galaan,laakiin dowladu waxay ku dhawaaqdey isbedelo lagu sameeyey barnaamijka qaxootiga kaasoo sidoo kale joojinaya ogolaanshaha dalabaadka qaxootiga qaar. Kudhawaaqistan oo faafaahsan waxaad kaheleysaa qaybaha hoose ee looga hadlayo mamnuucida qaxootiga.

### **Hadda sida ay tahay xaalada qaybta mamnuucida safarka ee kamid ah sharciga mamnuucida muslimiinta**

**Xaalada hadda jirta:** December 4,2017, maxkamadda ugu sarraysa mareykanka ayaa ogolaatey amarkii mamnuucida muslimiinta 3.0 ( Amarkii madaxweynaha ee taariikhdiisu ahayd September.24,2017) inuu si buuxda udhaqan galo oo lagu fuliyo muwaadiniinta udhashey wadamada Suuriya, Iiraan, Chad, Liibiya, Yaman, iyo Soomaaliya, iyadoo hataa ay ku jiraan dadka leh dood macquul ah oo kusaleysan xiriir qoys dhow(bona fide relationship) oo ay laleeyihiin qof ama urur kajira gudaha mareykanka .Bishii Abriil 10 keeda 2018 dowladda mareykanka waxay wadanka Chaad kasaartey liiska wadamada horey loogusoo rogey hayiraadaha haga socdaalka .

Amarkan wuxuu mar hore ku dhaqan galey oo lagu fuliyey dadka udhashey wadamada waqooyiga kuuriya iyo Venezuela laga soo bilaabo taariikhdu markey ahayd October 18,2017.

Mamnuucista muslimiinta 3.0 wuxuu xiligan hada lajoogo soo rogayaa hanibaadahan soo socda:

- **Syria:** Masoo gali karaan dadka soogalootiga ah iyo kuwa aan soogalootiga ahayba (immigrants and nonimmigrants).
- **North Korea:** Masoo gali karaan dadka soogalootiga ah iyo kuwa aan soogalootiga ahayba (immigrants and nonimmigrants).

<ul style="list-style-type: none"> <li>● <b>Iran:</b> Masoo gali karaan dadka soogalootiga ah iyo kuwa aan soogalootiga ahaynba (immigrants and nonimmigrants).marka laga reebo kuwa haysta fiiso sharci ah oo ardeynimo (F &amp; M) iyo isweydaarsi booqasho (J).</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>● <b>Libya:</b> Masoo gali karaan dadka soogalootiga ah iyo kuwa aan soogalootiga ahayba (immigrants and nonimmigrants).ee kusocda fiisooyin Ganacsi (B-1),Dalxiis (B-2),Ganacsi/Dalxiis (B-1/B-2).</li> <li>● <b>Yemen</b> Masoo gali karaan dadka soogalootiga ah iyo kuwa aan soogalootiga ahayba (immigrants and nonimmigrants).ee kusocda fiisooyin Ganacsi (B-1),Dalxiis (B-2),Ganacsi/Dalxiis (B-1/B-2).</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>● <b>Somalia:</b> Masoo gali karaan dadka soogalootiga ah (immigrants)</li> </ul>
<ul style="list-style-type: none"> <li>● <b>Venezuela:</b> Masoo gali karaan xubnaha hayadaha dowlada ee ay kusocdaan baaritaanada iyo talaabooyinka kale ee lagu hubinaayo iyo xubnaha qoysaskooda ee kusafraya qaabka aan soo galootiga ahayn (nonimmigrants) ee ku safraya fiisooyin Ganacsi (B-1),Dalxiis (B-2),Ganacsi/Dalxiis (B-1/B-2).</li> </ul>

“Immigrants” waa dadka raba iney mareykanka degaan ama weligood kunoolaadaan.

“Nonimmigrants”waa dadka raba iney mareykanka si kumeel gaar ah usoo galaan ama uyimaadaan , sida qofka inuu ardeynimo ama booqasho kuyimaado . Hayiraadahan kuma dhabiqmayaan qaybo kamid ah dadka safraya ee hoos ku qeexan.

Iyadoo laraacayo sharciga Mamnuucida muslimiinta 3.0, Hayiraadahan keliya waxay ku dhabiqmayaan dadka kusugan dibada mareykanka islamarkaana aan haysan fiiso sharci ah taariikhda sharcigan uu dhaqan galayo.sidoo kale hadii fiisahaaga la kansal gareeyey iyadoo laraacayo sharcigii mamnuucida muslimiinta 1.0,waxaa lagaa rabaa inaad hesho dokumenti socdaal iyadoo laraacayo xeerarka iyo sharuudaha fiisooyinka sharcinimadooda lajoojiyey ama lakansaley,waxaana lagaa cafin doonaa sharcigan ama kudhawaaqistan cusub (proclamation).Hadii xaaladaadu ay waafaqsan tahay xaaladaha aan sheegney fadlan laxiriir cinwaankaas [airport@refugeerights.org](mailto:airport@refugeerights.org)si aad u hesho caawimaadsharciyeed.

Hayiraadahan kuma dhabiqmayaan dadka hoos ku xusan:

- Dadka mareykanka kuleh deganaanshaha sharciga ah (sida dadka green cardka haysta);
- Dadka loo ogolaadey iney mareykanka yimaadaan kahor ama kadib taariikhda sharciga uu dhaqan galey.
- Dadka haysta dokumenti aan fiiso ahayn—sida warqad socdaal,warqad diyaarad raacis haboon, ama dokumenti fasax oo hore—oo shaqaynaayo taariikhda sharcigan uu dhaqan galey ama lasiiyey taariikh kasta oo kadambeeysey xiligaas kaas oo u ogolaanaya inuu mareykanka usafro islamarkaana uu dalbado gelitaan ama ogolaansho.
- Dadka leh labada dhalasho ama baasaboor ee ku safraya baasaboor wadan kale oo aan kamid ahayn wadamada hayiraada lagusoo rogey.
- Dadka ku safraya fiisooyin diblomaasiyeed , fiisaha wadamada gaashanbuurta NATO, fiisaha C-2 ee loogu safro qaramada midoobey, ama fiisooyinka noocyadan ah G-1,G-2,G-3 ama G-4.
- Ama kuwa loo aqbaley qaxootinimo ama lasiiyey megangalyo,aan wadanka laga saari Karin, fasax ama ogolaansho hore haysta, ama haysta difaacis iyadoo laraacayo sharciga qofka kadifaacaya jirdilka.
- Hayiraada sidoo kale kuma dabiqmayso ogolaanshaha qaxootiga, taasoo sidoo kale ay hadideyso hayiraadaha hoos kuqoran.

Cafin baa laga yaabaa in loo sameeyo iyadoo si gooni gooni ah loo eegi doono xaalad walba (case-by-case) dadka loo arko iney dhibaato ku iman karto hadii loo diido iney mareykanka soo galaan ,islamarkaana wax xalis ah kukeeni Karin amniga qaranka ama badbaadada dad weynaha mareykanka,islamarkaana ay kujirto “danta qaranka mareykanka”sharcigan ama war qoraalkan cusub wuxuu tilmaamaya in tusmooyin dheeri ah laga bixin doono arinta kusaabsan cafinta,laakiin cafintu waxay munaasab noqon kartaa marka laheloo xaaladahan hoose:

- Qofka horey loogu ogolaadey inuu mareykanka soo galo si uu ujooga waqti islamarkaana uqabto hawl waqti dheer soconeysa,islamarkaana kusugnaa dibada mareykanka markii sharcigan uu dhaqan galaayey, ee raba inuu dib usoo galo mareykanka si uu dib ugu bilaabo hawshiisi,diidmo loo diido inuu wadanka soo galana ay dhaawici karto hawshiisa;
- Qofka horey ula yeeshey xiriiro ama wadashaqeyn muhiim ah mareykanka, laakiin wadanka dibadiisa kusugunaa markuu sharcigan dhaqan galayey sida inuu u joojey shaqo, waxbarasho ama hawlo kaloo sharci ah;
- Qofka raba inuu mareykanka usoo galo shaqooyin muhiim ah ama waajibaad xirfadeed kaas oo hadii loo diido inuu wadanka soo galo xirfadiisa ama shaqadiisa hoos udhici karto ;
- Qofka raba inuu soo booqdo ama lajoogo xubin dhow oo qoyskiisa ah xubintaas oo ah muwaadin mareykan ah,ama qof haysta deganaansho sharci ah,ama qaab sharci ah

loogu ogolaadey in wadanka ku joogo fiiso aan soo galooti ahayn, diidmo loo diido inuu wadanka soo galana ay kukeeni karto qofka xaalad adag oo aan laga fursan Karin;

- Qofka ah caruur, ama cilmo aad uyer ama cilmo lasoo korsadey oo u baahan daryeel caafimaad oo degdeg ah, ama ay soo wajaheen daruufo kale oo gaar ah oo cudur daar unoqonaayo gelintaankiisa wadanka;
- Qofka ay shaqaaleysiisey dowlada mareykanka ama qof mareykanka wakiil ka ah ( ama ah qof sharciyan dulsaar ku ah qofkaas shaqaalaha ah) islamarkaana keeni kara documents cadaynaaya iney dowlada mareykanka uqabteen adeegyo dhab ah oo qiimo badan;
- Qofka haysta deganaansho wadanka Canada ee fiiso kasoo dalbada meel kamid ah gudaha wadanka Canada;
- Qofka u safraya ujeedooyin laxiriira dowlada mareykanka ama urur caalami ah.

Mamnuucistii muslimiinta ee tirsigiisu ahaa 3.0 (muslim ban 3.0) wuxuu sheegayey in hayiraadahan safarka uu si degdeg ah ugu dhabiqmaya muwaadiniinta udhashey wadamada Iiraan, Liibiya, Soomaaliya, Suuriya iyo Yaman ee aan lalahayn wax xiriir dhow ah qof ama urur kajira mareykanka oo ay ku doodayaan.

Shaqsiyaadku waxay layeelan karaan xiriir dhow “bona fide relationship” qof ama urur mareykanka kajira hadii ay jirto xaaladahan hoos kuqoran:

- (1) Hadii ay leeyihiin xiriir qoys oo dhow, sida waalidiintaada, sodohdaada iyo sodogaada, lamaanayaasha is qaba, gabar/wiil labada qof ee isu doonan, walaalahaaga (wiilal iyo gabdho), walaalahaaga xaasaska ay qabaan (wiilal iyo gabdho), Caruurtaada, Caruurtaada xaasaska ay qabaan (wiilal iyo gabdho), Awoowayaashaa (awoowe iyo ayeeyo), Caruurta aad awoowga ama ayeeyada utahay, Eedooyin/Abtiyaal ama adeeradaa, gabdhaha/wiilasha ay walaalahaagu dhaleen . ee kusugan mareykanka; ama
- (2) Hadii ay laleeyihiin xiriir leh cadeymo dokuments ah urur mareykanka qaab sharci ah uga dhisan, sida dadka qubuulka ama ogolaanshaha kaheley xaruumaha waxbarasho ee mareykanka kuyaala, ama qof wax shaqaaleysiiya uu shaqaaleysiiyey, ama lagu casuumey inuu hadal kajeediyo meel jamaahiir isugu imanayaan oo gudaha mareykanka ah .

Dhamaan dadka kale ee uu sharcigan saameynayo, sharciga mamnuucista muslimiinta ee tirsigiisu yahay 3.0 ( muslim ban 3.0) wuxuu sheegayaa in xayiraadu ay dhaqan galayso laga bilaabo 12:01 a.m. eastern daylight time on October 18, 2017. Maxkamadaha federaalka ayaa markii hore amrey inuu dhaqan galo qaybo kamid ah sharciga mamnuucista muslimiinta 3.0, laakiin maxkamadda ugu sareysa mareykanka ayaa ogolaatey inuu sharcigan si buuxda udhaqan galo oo lagu fuliyo dhamaan muwaadiniinta uu saameynayo sharcigan iyadoo aan la eegeynin hataa hadey laleeyihiin xiriir dhow oo qoys qof ama urur kajira gudaha mareykanka waxa loo yaqaano “bona fide relationship” laga bilaabo bisha December 4, 2017.

## **Hadda sida ay tahay xaalada Qaybta mamnuucista qaxootiga ee sharciga Mamnuucista muslimiinta.**

**Xaalada hada jirta:**

**Bishii febraayo,1,2018 Dowladdu waxay hirgelisey nidaam baaritaan cusub oo la marinaayo Dadka qaxootinimada dalbanaaya ee raba iney dib ula midoobaan xubno qoysaskooda katirsan oo horey qaxootinimo mareykanka dib udejin looga siiyey barnaamijkaas oo loo yaqaano follow-to-join (visa 93), iyadoo lamarinaayo baaritaano amni oo dheeri ah.**

**Bishii janaayo,22,2018 Dowladdu waxay soo gabagabaysey dib eegistii ay kusameyneysey nidaamka baaritaanka qaxootiga waxayna hirgelisey nidaam baaritaano cusub loogu sameynaayo dadka udhashey wadamada kala ah masar,liiraan, Ciraaq,liibiya ,Maali, Waqooyiga Kuuriya,Soomaaliya, Jamhuuriyadda koonfurta Suudaan, Suudaan, Suuriya iyo Yaman.**

**Amarkii maxkamadda federaalka ay soo saartey bishii December,23,2017 ee hayiraadii lagusoo rogey October ,2017 dadka qaxootinimada dalbanaaya ( ee hoos ku faahfaahsan) looga qaadey hadey laleeyihiin xiriir qoys qof ama urur gudaha mareykanka kajira ee loo yaqaano “bona fide relationship” weli amarkaas wuu shaqeynayaa , qaxootigu waxay yeelan karaan xiriir dhow markey jirto labo xaaladood midood:**

- (1) Hadii ay leeyihiin xiriir qoys oo dhow, sida waalidiintaada,sodohdaada iyo sodogaada, lamaanayaasha is qaba, gabar/wiil labada qof ee isu doonan,walaalahaaga (wiilal iyo gabdho),walaalahaaga xaasaska ay qabaan (wiilal iyo gabdho), Caruurtaada, Caruurtaada xaasaska ay qabaan (wiilal iyo gabdho),Awoowayaashaa(awoowe iyo ayeeyo) , Caruurta aad awoowga ama ayeeyada utahay, Eedooyin/Abtiyaal ama adeeradaa, gabdhaha/wiilasha ay walaalahaagu dhaleen . ee kusugan mareykanka; ama
- (2) Hadii ay laleeyihiin xiriir leh cadeymo documents ah urur mareykanka qaab sharci ah uga dhisan, sida dadka qubulka ama ogolaanshaha kaheley xaruumaha waxbarasho ee mareykanka kuyaala, ama qof wax shaqaaleysiiya uu shaqaaleysiiyey, ama lagu casuumey inuu hadal kajeediyo meel jamaahiir isugu imanayaan oo gudaha mareykanka ah .

Bishii october 24,2017, madaxweynuhu wuxuu soo saarey amar dib loogu bilaabayey barnaamijkaa qaadashada qaxootiga mareykanka iyadoo la isticmaalayo baaritaano hormarsan , amarkaas oo ay wahelisey qoraal rasmi ah oo kusocdey madaxweynaha kana soo baxay wasaaradda arimaha dibadda, waaxda amniga qarranka iyo xafiiska agaasimaha sirdoonka qarranka. Laakiin dowladdu dib uma bilaabin barnaamijka qaxootiga ee dhamaan dadka qaxootinimada dalbanaya.

amarkii soo baxay bisha October ,24 iyo war qoraalkii weheliyey waxay hanibaad kusoo rogeen labo koox oo kamid ah dadka qaxootinnimada dalbanaya:

- (1) **Dadka qaxootinimada dalbanaya ee u dhashey 11 kan wadan : Masar, Iiraan, Iraq, Liibiya, Mali, Waqooyiga kuuriya, Soomaaliya, Jamhuuriyada koonfurta suudaan, Suudaan, Suuriya, iyo Yaman, sidoo kale dadka aan wadamada lahayn ee xiliyadii ugu dambeysey si joogta ah ugu noolaa mid kamid ahwadamadan.** Mudo 90 maalmood ah, mareykanku wuxuu qorsheeyey inaan wax mudnaan ah lasiin doonin dalabaadka qaxootinimo ee ka yimaada shakhsiyaadkan.

War qoraalku wuxuu tilmaamey in Dowladu weli ay tix gelin karto suurtagalnimada aqbalaada qaxootinimo ee dadka dib u dejintooda mareykanka ay “dano siyaasado dibadeed oo uu mareykanku leeyahay xaqiijin karto in lagaaro, iyadoo aan laga tanaasuleyn amniga qaranka iyo bed qabka mareykanka” waxaana loo ictiraafi doonaa “case walbo in si gooni gooni ah loo eego keliya qaxootiga aqbalaadooda loo arko iney kujirto danta qaranka islamarkaana aan wax xalis ah kukeeneynin amniga iyo bedqabka mareykanka” dowladu waxay sheegtey in 90 maalmood kadib ay go’aan ka gaari karto wixii ilaalin dheeri ah ee barnaamijkan lagamamaarmaanka u ah, hadiiba ay jiraan.

- (2) **Dalabaadka qaxootiga ee qoysaska dib loogu mideynayo. ( Follow-to-Join Refugee Applicants).** Waqti aan hadidnayn, barnaamijka dib umideynta qoysaska qaxootiga ah ( sidoo kalana loo yaqaano visas 93), kaasoo ogolaanaya lamaanayaasha is qaba iyo caruurta aan weli guursan ee dadoodu kahooseyso 21 sano iney kubiiraan xubnaha qoysaskooda ee horey mareykanku dib udejinta usiiyey ayaa la joojiyey dhamaan jinsiyadaha oo dhan .dowladu waxay sheegtey in ay ka shaqeyn doonto sidii ay u fulin lahayd qaab baaritaano u gaar ah qaxootiga noocan ah. Qoraalkan rasmiga ah laguma cadayn barnaamijka dib umideynta qofka megangalyo doonka ah iyo xubnaha qoyskiisa ( ee sidoo kale loo yaqaano visas 92) kaasoo lagu aqbaley megan galyo raadis ee aan ahayn ogolaansho qaxootinimo.

### **Maxaan sameynayaa hadii aan ka walwalsanahay in la I xiro intaan ku guda jiro safarka soo socda?**

Mamnuucistii muslimiinta 1.0 wuxuu garoomada wadanka kadhaliyey jaxwareer iyadoo kumanaan qof lagu xirey garoomada. Ma fileyno in sharcigan cusub uu saameyn noocaas ah ku yeelan doono garoomada iyadoo la og yahay keliya inuu ku dhabiqmaha dadka kusugan dibada mareykanka ee aan haysan fiiso shaqeyneysa taariikhda sharcigan uu dhaqan galayo, sida aan kor kusoo sharaxney.

Mar walbo waa fikrad fiican inaad siiso qof aamin ah oo qoyskaaga katirsan ama saaxiib wadada safarkaaga iyo meelaha aad soo mari doonto kahor intaadan mareykanka usoo safrin. kadib marka aad soo degto iyo inta diyaaradaada ay alaabta kuu dejineyso, si dhakhso ah ulaxiriir qofkan si aad ugu xaqiijiso inaad timid islamarkaana uu ula xiriirto qareen hadii aad ku dhameysan weyso baaritaanadaada socdaalka mudo 2 saacadood gudohood ah.

Kastanada iyo siyaasada ilaalinta xuduudaha wadanka ee loo yaqaan (“CBP”) waxay ubaahan yihiin in saraakiisha joogta ay kuula dhaqmaan “qaab aadaab iyo xirfadi ku dheexan tahay” waad soo qori kartaa hadii aad aragto sarkaal CBP ah oo aan aadaab lahayn si warbixin looga diyaariyo.

Khadka garoomada ee IRAP lagala xiriiri karo waa [airport@refugeerights.org](mailto:airport@refugeerights.org). macluumaad dheeri ah ayaad ka heli kartaan halkan

## **Macluumaad Dheeri ah**

### **Oo Loogu Tala Galay Dadka Safraya ee uu Saameeyay Amarka Socdaalka**

Midowga mareykanka ee difaaca xuquuqda iyo xuriyada madaniga ah (ACLU), ogow xuquuqdaada hadii aad kulakulanto arimo sharci garoomada iyo goobaha kale ee wadanka mareykanka laga galo, <https://www.aclu.org/know-your-rights/what-do-when-encountering-law-enforcement-airports-and-other-ports-entry-us>

Ururka Qareenada Sharciga Socdaalka ( AILA ) Si aad u raadso qareen haga Socdaalka ah : <http://www.aialawyer.org/>

Iska diiwaan geli Ururka qareenada mareykanka: <https://www.nlg.org/chapters/>

Liiska bixiyeyayaasha adeegyada sharciyeed ee haga socdaalka ah ee katirsan wasaarada cadaalada mareykanka : <https://www.justice.gov/eoir/list-pro-bono-legal-service-providers-map>

Kuwa bixiya adeegyada sharciyeed ee ka tirsan shabakada arimaha socdaalka u dooda : <https://www.immigrationadvocates.org/nonprofit/legaldirectory/>

Liiska ururada taabacsan midowga mareykanka ee xuquuqda iyo xuriyada shacabka (ACLU): <https://www.aclu.org/about/affiliates>

Iska diiwaan geli Golaha Xiriirka Mareykanka iyo Islaamka: <https://www.cair.com/cair-chapters.html>

### **Qaxootiga ku sugan gudaha mareykanka ee u baaxan talo siin ama caawin Hala xiriiraan**

Xaruunta Qaxootiga ee online ka ah , Macluumaadka ,(Ogow Xuquuqdaada ) [https://therefugeecenter.org/resources/rights\\_laws/](https://therefugeecenter.org/resources/rights_laws/)

Xaruunta Qaxootiga ee online ka ah , Macluumaadka maxaliga ah , <https://therefugeecenter.org/in-your-city/>

Xafiiska dib udejinta Qaxootiga , Agaasimaha barnaamijyada gobalka, <https://www.acf.hhs.gov/orr/state-programs-annual-overview>

### **Qaxootiga ku sugan Dibada mareykanka ee u baaxan talo siin ama caawin Hala xiriiraan**

Ururka Caalamiga ah ee Xuquuqda Qaxootiga: Xuquuqda haga masaafurinta, <http://www.refugeelegalaidinformation.org/>

Hay'ada Qaramada Midoobey u Qaabilsan Qaxootiga ee UNHCR, <http://www.unhcr.org/en-us>

Mashruuca Caalamiga ah ee Caawinta Qaxootiga , <https://refugeerights.org/contact-us/>

### **Qareenada raadinaaya macluumaad sharciyeed oo kusaabsan isbedelada cusub ee haga socdaalka hala xiriiraan**

Talooyin iyo wixii soo kordha (ururka Qareenada Mareykanka ee Socdaalka) (AILA): <http://www.aila.org/advo-media/issues/immigration-2017-a-new-president-and-congress>